



Buug-yaraha SafeOregon oo la helayo kaasi oo loogu talagalay bulshada PPS

Tan iyo Sibtambar 2017-kii, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay bulshadeeda ku dhiirigelinaysay in ay isticmaalaan khadka talada ee SafeOregon si ay u soo sheegaan xaaladaha aan ammaanka ahayn, ha ahaadaan hanjabaadaha rabshadeed, dagaal, daroogo iyo aalkolo, hub, xoog isku muquunin, dhibaateyn, cabsigelin, ama waxyeellada qofku isku geysto.

SafeOregon waa maalgeliyay Sharci dejinta Oregon maalgelisay iyada oo uu qayb ka yahay dadaalka gobolka oo dhan ee lagu wanaajinayo ammaanka dugsiga. Khadka taladu wuxuu bixiyaa hab ammaan ah oo loogu talagalay in qof iyada oo aan magac la socon uu soo sheego xaaladaha shakiga leh ama aan ammaanka ahayn ee mar kasta dhici kara.

Qof kasta, laga soo bilaabo arday ilaa waalidiinta ilaa laga gaarayo xubnaha bulshada ka tirsan, waxay nidaamka u geli karaan siyaabo kala duwan, oo ay ku jiraan:

- Badhanka ay ku qoran tahay “Report unsafe behavior” oo laga helayo website kasta oo ay leeyihiiin dugsiyada PPS.
- [Website-ka SafeOregon](#)
- Wicitaan toos ah/farriin telefoon (844-472-3367)
- Email loo dirayo tip@safetoregon.com
- Nidaamka la isticmaalo telefoonka gacanta ‘mobile app’ ayaa laga soo dejin karaa/min-guurin karaa telefoonka casriga ah ee gacanta Telefoonkaaga Casriga ee Gacanta iyada oo la isticmaalayo iTunes ama Google Play

Si hadalka loo sii gudbiyo oo dadka la gaarsiiyo waxyaboo ku saabsan ilahani, PPS waxay jeelaan lahayd in ay dadka la wadaagto meelaha laga sii gelayo buug-yaraha SafeOregon oo ku qoran Ingiriisi iyo sidoo kale shanta luqaddood ee ay taageerto degmadu ee hoosta ku qoran.

[SafeOregon – English](#)

[SafeOregon – Isbaanish ah](#)

[SafeOregon – Vietnamese](#)

[SafeOregon – Chinese](#)

[SafeOregon – Russian](#)

[SafeOregon – Soomaali ah](#)

Fadlan xiqiji in aad macluumaadkan la wadaagto asxaabtaada iyo qoyskaaga – waxaanad xasuusisaar ardaydaada: Haddii aad wax aragto ama maqasho, wax dheh - si dhakhso ah. Aanu ka wada shaqeyno in aad bulshadeeda ka dhigno mid badbaado leh.